Talaalka cudurka COVID-19 ee gobolka Salt Lake

Su’aalaha badanaa la is waydiiyo

Yaa mudan in la talaalo?

Waxaa si gaara ah waalidiinta loogu boorinayaa in ay iska talaalaan cudurkan COVID. Talaalka Pfizer waxaa loo ogol yahay qof kasta oo da’adiisu tahay **16 jir ama ka wayn;** talaalka casriga ah waxaa loo ogal yahay qof kasta oo daydiisu tahay **18 jira ama waxa ka wayn.** Dadka qaba xasaasida aad u daran iyo hooyooyinka uurka leh ama nuujiya caruurta waa in ay la tashanayaan dhakhtarkooda ka hor inta aanay is talaalin.

Hore ayuu iigu dhacay COVID; ma iska talaali kara?

Haa, waa lagaa talii karaa markaa aad xanuunka ka bogsado mudada karartiilkuna dhamaato.

Ma jiro macluumaad buuxa oo hada la heli karo ama odhan karo qofka marka uu cudurku ku dhaco ee uu ka bogsoodo cudurku COVID-19, wuu ku soo noqon kara iyo kuma soo noqon karo, laakiin waxaa lagula talinayaa inuu qof waliba uu is talaalo COVID.

Waa imisa lacagta la iskaga talaalayo cudurka?

Talaalka cudurku waa lacag la’aan. Hadii aad caymis caafimaad leedahay, talaal bixiyayaashu (oo ay ku jiraan waxaad caafimaadka ee degmada Salt Lake) waxay qarashka talaalkaaga ku soo dalacayaan Shirkada Caymiskaaga. Hadii aanad caymis caafimaad lahayd, lacag laguguma soo dalici doono.

Talaaku ma yahay amaan?

Maraykanka dhexdiisa waxaa jira talaabooyin badan oo la qaaday si loo hubiyo bad qabka talaalka iyo waxtarkiisaba. Talaabooyinka la qaaday waxaa ka mid ah tijaabooyin oo ay dib u eegis ku sameeyeen saynis yahano badan oo madax banana, xirfadlayaal caafimaad iyo khuboro ku takhasustay caafimaadka bulshada. **Talaalka cudurka COVID wuxuu soo maray talaabooyin adag, sida dhamaan talaallada kaleba maraan; mana jiraan wax talaabo ah oo laga booday ama lagu degdegay.**

Talaalka cudurka ma badbaadin karaa bulshooyin dhaqano kala duwan leh?

Talaalka cudurka COVID-19 wuu badbaadi karaa dhamaan qoomiyada jinsiyo kala duwan leh. Saynis yahanadu waxay tijaabiyeen talaalka ayagoo adeegsanaya hababka uga wanaagsan oo loogu tijaabiyo dhamaan bulshooyin jinsiyada kala duwan leh si loo hubiyo inuu u leeyahay naajiijooyin wax ku oola dhamaan bulshooyinka. Waanu xaqiiqsan nahay in ay jirto kalsooni daro talaalada laga qabo – wakhti hore iyo iminkaba, gaar ahaan dadka midabka ah- madaamoo cudurka COVID-19 ay waxyeeladiisu ku sii badanayso dhamaan bulshooyinka dhaqamada kala duwan leh, in ay cudurka laga ilaaliyo bulshooyinkeena midabka ah waa muhiim, hadii qofku doonaayo inuu si adaga cudurka iskaga difaaco waa inuu is talaalo.

Ma dooran karaa nooca talaal ee aan doonaayo?

Wakhtigan jawaabtu waa maya, wuxuunbaad helaysaa nooca yaala goobta aad booratay, talaalada goobaha yaalaana waxay isu bedeli doonaan is joogto ah sidaa daraadeed ha filanin inaad nooc gaar ah aad ka hesho goob gaar ah.

Sidee ayaa talaalkan loo helay sida ugu dhakhsa badan leh?

Casharadii laga bartay talaaladii hore ee loogu talo talay in lagu daweeyo cudurada la mid ah ee ay sababaan fayrisyada corona (Severe acute respiratory syndrome (SARS) iyo Middle East respiratory syndrome (MERS)) ayaa waxay gacan ka gaysteen soo saarista talaalka cudurka COVID. Tusaale ahaan, cilmi baadhis lagu sameeyey talaalka coronavirus ee lagu sameeyey cudurkii SARS ayaa la soo saaray 2004 kii!

Talaalku miyuu waxyeelo leeyahay? Maxayse yihiin waxyeelooyinkiisu?

Talaalkan waxaa qofka laga siinayaa garabka, sida talaaleda kaleba looga siiyo. Marka talaalkan garabka lagaa siiyo waxaa kugu dhici kara xoogaa xanuun ah iyo barar. Dadka qaar waxaa laga yaabaa in ay dareemaan qandho fudud iyo daal, xanuun, dhaxan ama madax xanuun oo socon doona maalin ama laba maalmood. Dhibaatooyinkani waxay inta badan ku dhacaan dadka da'ada yar ka dib marka ay dhibicda labaad ee talaalka qaataan. Jaabahani waa caalamado muujinaaya in nidaamka difaaca jidhkaagu uu soo noolaanaayo oo uu samaynaayo wixii laga rabay inuu sameeyo. Xaalada qaarkood, raaxo daro yar oo ay keenaan qandho ama xumadu waa wax iska caadi ah. La xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarumaha daryeelka caafimaadka.

> Hadii ay ku guduudnaato ama ay ku damqato meesha talaalka lagaa siiyey 24 saacadood ka bacdi.
>
> Haadii dhibaatooyinka uu gaystay talaaku ay kaa warwariyaan ama kaa tagi waayaan maalmo yar ka dib.

Talaalka cudurku ma ka qaadi karaa cudurka COVID-19?

Maya.

Talaalka kuma jiraan fayrisyo nooli kuumana keeni karo COVID.

Siduu talaalku u shaqeeyaa? Miyuu saamayn u gaysan karaa hido sidayhayga ama DNA da?

Talaalada laga keenay Pfizer iyo Moderna waxay adeegsadaan farsamo loo yaqaano mRNA, ama RNA. Ka fikir habkan uu talaalku uu unugyada jidhkaaga u siinaayo fariin iyo awaamiir faahfaahsan oo ay unugyada difaaca jidhkaagu kaga gaashaaman laaheeyeen fayriska cudurka COVID — hadaba habkan, jidhku wuxuu ku baranayaa sidii uu si iskiis ah asagu difaac u samaysan lahaa fayrisku soo galo. Talaalka mRNA ma isticmaalo fayraska nool ee keena COVID, sidoo kale mRNA ma galaayo bu'da unuga, halkaan oo ah halka lagu kaydiyo (hido sidayaasha) DNA da. Marka la soo koobo, talaalkani wuxuu kaa difaacayaa cudurka COVID mana bedelaan ama saamayn kuma yeeshaan hido-sidahaaga sinaba.

Hadii aan xaasaasiyad qabo, miyay tahay in aan iska ilaaliyo?

Dadka qaba xasaasiyada daran ee ay la soo deristay ee xaalad darani la soo darsi karto (xaasaasiyad laga yaabo in ay noloshaada halis u horseedi karto oo badanaa ku lug leh barar, finan, cadaadiska dhiiga oo hoos u dhaca iyo xaalado kale oo daran) hadii tani dhacdo waa in ay kala hadlaan dhakhtarkooda ama qofka talaal bixiyaha ah, wixii ku saabsan badbadada leh ee talaalka loo qaadanaayo iyo sida taxadarka leh ee loo qaadanaayo.

Talaalka ma qaadan karaa hadii aanan sharci lahayn?

Haa.

Laguma waydiin doono wax ku saabsan sharci sabab kasta. Inta waxaa sii dheer, wixii macluumaad ah ee lala wadaago xarumaha caafimaadka bulshada waxay noqon doonaan macluumaad si gaar ah loo ilaaliyey oo **AAN** cidna lala wadaagi doonin, oo ay ku jiraan wakaalado kale nooca ay donaanba ha ahaadaane.

Qaadashada talaalka ma waxaa loo arkaa "dulsaarka bulshada"?

Maya, qaadashada talaalku LOOMA arko inay tahay inaad jabisay sharciga dulsaarka shacabka.

Mudo intee leeg ayey qaadan doontaa in laga shaqeeyo?

Labada talaal ee Pfizer iyo Moderna, waxaa 14 maalmood kadib loo arkaa inaad badbaado qabto marka aad xadiga labaad qaadato.

Miyaan u baahan nahay laba jeer?

Haa. Labada talaal ee the Pfizer iyo Moderna waxay u baahan yihiin laba jeer in la qaato oo si buuxda waxtar u leh. Talaalka Pfizer, waxaa lagu siin doonaa talaalka labaad ugu yaraan 21 maalmood ka dib markaad qaatado talaalka koowaad. Talaalka Moderna, waa inaad qaadataa talaalka labaad 28 maalmood ka dib talaalka koowaad.

Gormaan qaadan karaa talaalka labaad?

Hadii aad hore u qaatatay talaalka Pfizer, waxaad qaadan doontaa talaalka labaad 21 maalmood ka dib marka aad qaatado talaalka koowaad. Hadii aad hore u qaatay talaalka Modern, talaalka labaad waxaad qaadan kartaa 28 maalmood ka dib.

Uma baahnid inaad qaatato talaalka labaad maalinta 21 ama 28 lafteeda; waxay noqon kartaa wakhti kasta ka dib maalintaas.

Maxaa igu dhacaaya kadib marka aan talaalka qaato?

Way kuu wanaagsan tahay inaad raacto talaabooyinka looga digtoonaanayo cudurka COVID xitaa hadii lagu talaalo; wakhti ayey qaadan kartaa intuu jidhkaagu unugyadiisii difaaca dib u dhisto kadib markaad talaalka qaadato. Waxaynu u baahanahay in aynu qayb aad u badan oo bulshadeena ahi ay qaataan talaalka kahor inta aynaan bilaabin wajidboolashada, kala fogaanshaha bulshada iyo taxadarada kale ee ka hortaga caabuqa in la iska daayo – taasna waxay qaadan doontaa dhawr bilood.

Mudo intee leeg ayuu talaalku socondoonaa? Miyaan u baahanay talaal kale sanadka xiga?

Taa waa la go'aamin doonaa. Waxaa macquul ah inuu cudurka coronavirus uu si sanadle ah u soo noqdo, sida hargabka oo kale. Ama waxay noqon kartaa in faa'idooyinka talaalku sii socdaa in ka badan sanad. Waa in aan sugnaa sida uu talaalkani inooga ilaalin karo cudurka.

Cida loo shaqeeyaa miyay waajibisay talaalka?

Loo shaqeeyayaashu waxay xaq u leehyihiin in ay shaqaalahooda ku qasbaan in ay is talaalaan. Nidaamyada badan ee cusbitaaladu, tusaale ahaan, waxay u baahan yihiin in ay hargabka iskaga talaalaan si sanadle ah. Laakiin shaqaaluhu waxay raadsan karaa in laga dhaafo ayagoo ku salaynaaya sababo caafimaad ama

caqiidooyin diimeed. Xaalada noocaas ah, loo shaqeeyayaasha waxaa laga rabaa in ay bixiyaan “qaabilaad macquul ah” — hadii aan laga talaalin coronavirus, tusaale ahaan, shaqaalaha waxaa loo ogolaan karaa in ay shaqeeyaan hadii ay xidhaan afsaab, ama ay guriga ku shaqeeyaanba.

Xagee Ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraa ah?

Bookho Xarunta Maraykanka ee Xakamaynta iyo Kahortaga Cudurada wixii macluumaad dheeraah ah ee ku saabsan COVID iyo talaalka.